

**FOURTH JUDICIAL DISTRICT
(Maxkamaddaha Deganka Afraad)**

**HOUSING COURT
(MAXKAMADDA DHAGAYSATA DAWADDA GURYAHA)**

**DIIWAANKA LAGA SAARO/LAGA QARIYO DADWEYNAHA
(EXPUNGEMENTS)**

**Weydiisashada Maxkamadda in ay dadweynaha ka qariso in Guri lagaa
Saaray**

**WAA MAXAY MACNAHA
DIIWAANKA LAGA SAARO/LGA QARIYO DADWEYNAHA?**

- diiwaanka Ka Saaridda/ka qarinta dadweynaha macnaheedu waa in laga saaro diiwaanka/rikoorka talaabo maxkamadi qaaday ee ku jirta diiwaanka qofka. Haddii diiwaanka laga saaro in guri si sharci daro ah lagaaga saaray, qofkii wax ka raadinaayaa faylasha maxkamaddu kama heli karo diiwaanka in guriga lagaa saaray. Sharcigu waa u ogolyahay in maxkamaduhu ka saaraan diiwaanka dacwadaha guri ka saaridda ah, laakiin waa xaalado tiradoodu yartahay:
- Waa in sheegashada kireeyaha aysan ku salaysan xaqiiqo la taaban karo iyo sharciga:
- Waa in diiwaanka laga saarayaa “uu yahay mid si cad ugu danaynaaya cadaaladda” iyo
- “danta bulshada ee ogaanshaha diiwaanka” waa in ay ka muhiimsanaan doonto “danta laga leeyahay cadaaladda”

**WAA MAXAY SABABTA AAN U RAADINAYO AMARKA
DIIWAAN KA SAARID?**

- Dacwadda talaabada laga qaaday ay tahay in si sharci ah guri lagaaga saarayo waxay rikoorkaaga ku jiraysaa toban sano. Shirkad kasta oo baaris ku sameysa kirayste waxaa laga heli kara diiwanka qofka.

**GOORMA AYAAN MAXKAMADDA WEYDIISTAA
IN WAX LAGA SAARO DIIWAANKA?**

Dacwadaha waa kala duwan yihiin, haseyeeshee guud ahaan in dacwadaha laga saari karaadiiwaanka. Guud ahaan, ha weydiisan in diiwaanka laga saaro illaa:

Aad kiiska ku guulaysatay; ama

Aad kiiska heshiis ku dhamayseen, iyo in kireeye uu ogolaaday in uusan ama aysan haysan dacwad fiican; ama

Dacwadda lagaaga adkaaday maqnaansho sababtuna tahay in aadan warqadihii maxkamadda helin, aadna haysato cadayn xoog leh in kireeye uusan haysan dacwad wanaagsan oo liddi kugu ah.

**IN LAGA SAARO DIIWAANKA LA
OGOLAAN MAYO HADDII:**

- Dacwadda lagaaga adkaaday oo galka maxkamadda ay ku jirto in lagugu xukumay. Fadlan la tasho qareen haddii iyo sida xukunkaa looga saari karo diiwaankaaga;
- Aadan siin kireeye digniin haboon oo ku saabsan in aad codsatay in laga saaro diiwaanka ama aadan diiwaan gelin cadayn adeegga maxkamadda wakhti ku haboon;
- Aan kirada la bixin ka hor intaan dacwadda la diiwaan gelin, laakiin ka hor ama markii dhegaysiga maxkamaaddu ahayd laga heshiyyay oo kiraystuhu uu celiyay hantidii. In laga saaro diiwaanka dacwadda waa inaad codsataa maxkamaddana waajib kuma aha inay ogolaato.

SIDEE U HELI KARAA IN DACWADDA LAGA SAARO DIIWAANKA?

Haddii aadan raacin nadaamkan, dacwadaadu horay u socon mayso waxaana laga yaabaa in aad bixiso khrajka maxkamadda:

1. Eeg go'aanka maxkamadda ee dacwadda sida sharciga ah guriga lagaaga saaray. Haddii aadan nuqul ka haysan, waxaad tagtaa Xarunta dawladda (Government center) ee Degmada Hennepin, Qolka A-1700. Waxaad bixinaysaa \$5.00 nuqulkiiba. Maadaama aan faylasha oo dhammi aysan oollin Government Center, fayl kaaga oo laga keennaayo qayb kale (halka lagu xafido faylasha maxkamadda) wuxuu qaadan karaa todobaad.
2. Waxaad tagtaa Maxkamadda dhagaysata dacwada Guryaha ee Qolka A-1700 oo ku yaal Xarunta Dawladda si aad u buuxiso una diiwaan geliso codsigaaga.
3. Buuxi Ogaysiis Codsii/Mooshin iyo Codsii/Mooshin Laga Saarayo Diiwaanka (Notice of Motion and Motion for Expungement).
 - Foomka meesha u saraysa, ku buuxi magaca kireeyaha (meesha ay ku taal "plaintiff") iyo adiga magacaaga (meesha ay ku taal "defendant");
 - Fayl lambarka kiiska sida sharciga ah guriga lagaaga saaray;
 - Ha buuxin qaybta "Notice of Motion" illaa maxkamaddu ay ku siiso maalin kiiska la dhegaysanaayo iyo garsoore ama dhexdhexaadiye;
 - Buuxi meelaha banbanaan ee codsiga oo dhan;
 - Waxaad ku hor saxiixdaa Nootaayo ama Xoghaynta maxkamadda;
 - Ku lifaaq wixii waraaqo/dukumiinti dacwadaadda taageeraya
 -

Foomamka waxaa laga heli karaa Xarunta dawladda (Government center) ee Degmada Hennepin, Qolka A-1700 ama barta internetka:

<http://www.courts.state.mn.us/districts/fourth/>

- Marka ugu horeeya riix/gujji Housing Court; fiiri Forms Available.